

Xaashida Xaqiiqda: Sharciga Cusub ee Oregon ee ku saabsan Go'aan Gaarida La taageero

Muxuu u baahan yahay sharcigan cusub?

Dugsiyadu waa in ay bixiyaan macluumaad, tababar, iyo ilo ku saabsan:

- Go'aan gaarida la taageero iyo
- Siyaabo loogu talagalay in xubnaha ka tirsan qoyska iyo taageerayaashu ugu lug yeeshaan ugana qayb qaataan waxbarashada dhallinyarada iyo natiijooyinka dugsiga sare ka dib.¹

Goorma ayaa macluumaadkani loo baahan yahay in ila bixiyo?

Ugu yaraan, marka la joogo IEP (Barnaamijka Waxbarashada Shakhsi Ahaaneed) oo kasta halkaasi oo hadafyada waxbarashada iyo adeegyada kala guurka looga hadlo ee dugsiga sare dabadii (dugsiga sare ka dib) looga hadlo.

Goorma ayuu sharcigani dhaqan galayaa?

Sharcigani wuxuu dhaqan galayaa Janaayo 1, 2022.

Waa maxay Go'aan Gaarida La taageero?

Go'aan gaarida la taageero waxay kuu oggolaanaysaa in aad gaarto kala doorashooyin ku saabsan noloshaada iyada oo taageero laga helayo qoys, asxaab, ama xirfadle lagu kalsoon yahay.

- Waxaad u isticmaali kartaa go'aan gaarida la taageero si aad u aqoonsato cidda aad doonayso in ay ku taageerto iyo sida aad doonayso in lagu taageero. Qofka wax taageera ee aad doorato ayaa kaa caawin kara soo ururinta macluumaadka, qiimeynta waxyaabaha la kala dooranayo, ama kala xiriirida go'aankaaga ee dadka kale.
- Go'aan gaarida la taageero waa hab ay dadka oo dhan isticmaalaan mar uun.

¹ Fiiri HB 2105: <https://olis.oregonlegislature.gov/liz/2021R1/Measures/Overview/HB2105>

- Go'aan gaarida la taageero waxay noqon kartaa qorshe muhiim ah oo la isku weydiiyo haddii aad u baahan tahay taageero dheeraad ah si loo soo ururiyo macluumaad dheeraad ah, qiimeynta waxyaabaha la kala dooranayo, ama kala xiriirida go'aanadaada ee dadka kale.

Miyaynaan tani horeba u sameynin?

Haa! Go'aan gaarida la taageero wuxuu ahaa waxqabadka ugu wanaagsan oo loogu talagalay taageerida dadka qaba naafanimada muddo tobbonaan sano ah. Sida ku cad warbixintii 2018 ee ka socotay Golaha Qaranka ee Naafada, dadka iyagu qaata gaara go'aano u gaar ah waxay yeeshaan natiijooyin wanaagsan, waa kuwo leh madax banaani dheeraad ah kuna dhex milma bulshooyinkooda, oo si fiican loo shaqaaleysiiyo, caafimaad badan, waxayna awood u leeyihiin in ay si fiican u aqoonsadaan oo iska caabiyaan xadgudubka.²

Taariikhda. Waa maxay Sababta Sharciga La Soo Jeediyay ee 2015?

Si cad u aqoonsanaya go'aan gaarida la taageero ee hoos timaada sharciga Oregon si loo:

- Xaqiijiyo in dadka iyo qoysasku ay ka warqabaan in go'aan gaarida la taageero ay tahay mid la kala dooranayo oo banaan, oo aanan la raadin kala doorashooyin badan oo xaddidan oo aanan si aan loo baahnayn u xaddida xuquuqda qofka. Mas'uulnimadu aad bay u xaddidan tahay waxaana laga yaabaa in ay adag tahay in laga noqdo. Waa muhiim in marka hore la isticmaalo kala doorashada taageerada ee xaddidaada ugu yar leh.
- Si cad u gudbi go'aan gaarida la taageero oo cusbooneysii sharciga Oregon, si loo raaco wax qabadyada ugu wanaagsan ee gobolada kale oo badan sida ka muuqata liiska hoose.³

² Fiiri ["Ka baxsan Mas'uulnimada: Dhanka Beddelka Ee Dhiirigeliya Madax bannaanida Qof ahaaneed oo Weyn."](#) Warbixin ka socota Golaha Qaranka ee Naafada p. 131 (Maarso22. 2018).

³Gobolada ayaa dhawaan ansixiyay sharciyo si ay si cad ugu aqoonsadaan go'aan gaarida la taageero in ay qorshe iyo beddel xaddidan oo ka yar u noqdaan mas'uulnimada: [Indiana](#) (2019); [Rhode Island](#) (2019); [North Dakota](#) (2019); [Nevada](#) (2019); [Washington](#) (2019) [Maine](#) (2018); [Tennessee](#) (2018); [Alaska](#) (2018); [Delaware](#) (2016); [Wisconsin](#) (2018); [Texas](#) (2015). Intaasi waxaa dheer, [Mas'uulnimada](#)

- Xaqiijiyo hay'adaha bulshada iyo kuwa gaar ahi ay go'aan gaarida la taageero iyo doorka taageeraha u aqoonsan yihiin qorshe ahaan (tusaale, shaqaalaha daryeelka caafimaadka, daryeel bixiyayaasha guryaha la degan yahay, dugsiyada, barayaasha, hay'adaha adeega bulshada, garsoorayaasha, maxkamadaha, wakiilada, iwm.).

Waa maxay tababarka, macluumaadka, iyo ilaha la heli karo?

Macluumaad dheeraad ah ayaa laga helayaa:

- [Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon](#)
- [Waaxda Waxbarashada ee Oregon](#)
- [Waxbarashada Kala guurka ah ee Oregon](#)

[Isku mid ah, Wax ilaalinta, iyo Xeerka Nidaamyada Ilaalinta \(UGCOPAA, 2017\)](#) ayaa aqoonsan Go'aan Gaarida La taageero.

Wednesday, February 2, 2022